Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission

## Sharciga Fursadaha Loo Siman Yahay 2010 - Dib-u-habaynta ka-reebitaanka diinta

Dawlada Victoria waxay dhawaan isbedel ku samaysay Xeerka Fursadaha Loo Simanyahay (2010). Isbeddeladani waxay dhaqan galeen 14-kii Juun 2022. Isbeddelladani waxay xaqiijinayaan isu-dheellitirnaanta caddaaladda ah ee u dhexeeya xaqa xorriyadda diinta iyo xaqa ka madax-bannaanida takoorka.

Xaashidan xaqiiqadu waxay bixinaysaa macluumaadka ku saabsan isbeddelada sharciyada takoorka ee loogu talagalay ururada diinta iyo dugsiyada, iyo bulshada Victoria.

### Takoorka

Takoorku waa marka qofka loola dhaqmo si xaqdaro ah sababo la xiriira sifo shaqsiyeed oo uu sharcigu ilaalinayo.

Sharciga Fursadaha loo siman yahay (2010) wuxuu dhigayaa in takoorid iyo dhibaatayn galmo ay lid ku tahay sharciga marka ay ka dhacdo meelo ka mid ah goobaha dadweynaha. Tan waxaa ku jira goobaha shaqada, dugsiga ama dukaamada.

Si kastaba ha ahaatee, sharcigu wuxuu aqoonsan yahay baahida loo qabo in la isku dheelitiro xuquuqda qof kasta. Tan waxaa ku jira xuquuqda dadka leh caqiido diineed. Taas ayaana ah sababta ay u jiraan waxyaabo ka reeban oo macnaheedu yahay takooridu ma noqoneyso mid ka soo horjeeda sharciga xaaladaha qaarkood.

### Waxyaabaha ka reeban ee diinta (Religious exceptions)

14-kii Juun 2022 kahor, Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay (Equal Opportunity Act) wuxuu u ogolaa hay'adaha diinta iyo dugsiyada inay ku takoori karaan qofka sababo la xiriira mid ka mid ah sifooyinka shakhsi ahaaneed ee soo socda:

- galmada
- jihaynta galmada
- fal galmo oo sharci ah
- xaaladda guurka
- xaaladda guurka
- heerka waalidnimo

Kuwan waxa loogu yeedhi doonaa "sifada shakhsiyeed ee la iftiimiyey (the highlighted personal characteristics)" xaashidan xaqiiqda oo dhan.

Tani waxay ka dhigan tahay in iyada oo lagu salaynayo mid ka mid ah sifooyinka shakhsi ahaaneed ee la muujiyay hay'adaha diinta iyo dugsiyadu ay si sharci ah u sameyn karaan:

- diidmo ah in arday ay mustaqbalka soo galaan
- Arday ka saaraan
- Diidaan inay qof shaqaaleysiiyaan
- Qof ka eryaan shaqada, ama

- amaba qof ula dhaqmaan si gooni ah.

## Isbeddelada Xeerka Fursadaha Loo Simanyahay Laga Bilaabo 14-ka Juun 2022

Laga bilaabo 14-ka Juun 2022, hay'adaha diinta iyo dugsiyada looma oggola inay dadka takooraan iyadoo lagu salaynayo sifooyinka gaarka ah ee lagu muujiyay:

- go'aannada shaqada
- go'aannada ku saabsan ardayda dugsiga.

Si kastaba ha ahaatee, waxay samayn karaan takoorid ku salaysan caqiidada diineed, xaalado xaddidan, haddii takooriddu tahay mid macquul ah oo aan xad dhaaf ahayn.

## Takoorka la xiriira shaqada

Hay'adaha diinta iyo dugsiyadu ma eryi karaan, diidi karaan inay shaqaaleeyaan ama si kale uma takoori karaan shaqaalaha (iyo shaqaalaha suurtagalka ah mustaqbalka) sababo la xiriira mid ka mid ah sifooyinka gaarka ah ee la muujiyay.

Hay'adaha diinta iyo dugsiyada ayaa hadda takoori kara oo keliya shaqaalaha (iyo shaqaalaha suurtagalka ah mustaqbalka) iyadoo lagu salaynayo qofka diintiisa caqiidadiisa ama dhaqdhaqaaqa iyo kaliya haddii:

- u hoggaansanaanta caqiidada diintu ay tahay wax soo jireen ah (muhiim ah, lama huraan ah ama muhiim ah) oo looga baahan yahay shaqada

### Tusaalaha isbeddelka

Qofka haysta diinta masiixiga oo badelay jinsiyadii uu ku dhashay (transgender) haddii uu codsado inuu noqdo ku xigeenka madaxa urur samafal oo masiixiyiin ah.

Ururka masiixiyiinta ma diidi karaan inay shaqaaleeyaan qofka sababo la xiriira badalida uu badalay jinsiyada (transgender nimadooda). Sababtoo ah ma samayn karaan takoor ku salaysan aqoonsiga jinsiga.

Si kastaba ha ahaatee, tani macnaheedu maaha in ururka lagu qasbi doono inuu shaqaaleeyo qofka haddii aysan ahayn musharaxa ugu fiican.

- Qofka kale ma buuxin karo shuruudaas asalka ah ayadoo lagu sababeynayo diintiisa ama waxqabadkiisa
- Takoorkaas waa mid macquul ah oo ku habboon xaaladaha.

## Takoorka la xiriira ardayda

Dugsiyada diintu ma diidi karaan is-diiwaangelinta, mana cayrin karaan ama si kaleba uma takoori karaan ardayda iyo ardayda mustaqbalka sababo la xiriira mid ka mid ah sifooyinka shakhsi ahaaneed ee la muujiyay (tusaale ardaygu waa khaniis). Dugsiyadu way samayn karaan takoor ku salaysan arday, ama arday mustaqbalka ah, caqiidada diineed ama waxqabadyada. Si kastaba ha ahaatee, takooriddu waa inay noqotaa mid macquul ah oo u dhiganta xaaladaha iyo:

- In sidaas la yeelo waxa ay waafaqaysaa caqiidooyinka, waxa ay aaminsan yihiin ama mabaadi'da diinta, ama
- Takoorka ayaa si macquul ah lagama maarmaan u ah si looga fogaado dhaawac loo geysto dareenka diimeed ee diinta dugsiga.

## Takoorka hay'adaha diinta

Hay'adaha diintu way takoori karaan iyada oo lagu salaynayo mid ka mid ah sifooyinka gaarka ah ee la muujiyay ee duruufaha kale. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira shuruud cusub. Takoorku waa inuu noqdaa mid macquul ah oo u dhigma xaaladaha. Tani waxay ziyaado ku tahay shuruudaha jira ee ay tahay:

• mid waafaqsan caqiidada ama caqiidada diinta, ama

• si macquul ah lagamamaarmaan u tahay si looga fogaado dhaawac loo geysto dareenka diineed ee dadka diinta raacsan.

## Takoorka shaqsiyaadka

Shakhsiyaadka ma takoori karaan xaaladaha uu daboolayo Sharciga Fursadaha Loo Siman yahay si ay ugu hoggaansamaan caqiidooyinka diimeed.

## Isbeddelada Xeerka Fursadaha Loo Simanyahay Laga Bilaabo 14-ka Juun 2022

14ka Diseembar 2022, isbeddelo kale oo lagu sameeyo ka-reebitaanka diinta (religious exceptions) ee Xeerka Fursadaha loo siman yahay ayaa dhaqan galaya.

Laga bilaabo taariikhdan, marka iibinayo alaab ama la bixinayo adeegyada ay maalgeliso hay'adaha diinta ee Dawladda Victoria waxay awoodi doonaan oo kaliya inay takoorida ku saleeyaan caqiidada diineed ee qofka. Ma awoodi doonaan inay ku takooraan sifooyin kale oo shakhsi ah.

## Maxaa isbedeli doonin

Wixii ka dambeeya 14 Juun iyo 14 Diseembar 2022, hay'adaha diinta iyo dugsiyadu waxay weli awoodi doonaan inay takooris sameyn karaan taas oo la xiriirta:

• wadaad qortaan ama magacaabista wadaaddada, wasiirada diinta ama xubnaha nidaamka diinta

• tababarida ama wacyi galinta dadka doonaya in loo caleemo saaro ama loo magacaabo wadaado, wasiirada diinta ama xubnaha nidaamka diinta

• xulashada ama magacaabista dadka wax ka jeedinaya hawlaha la xidhiidha, ama ka qaybgalka, wax kasta oo diineed ama dhaqan ah.

## Ku dhaqanka sharciga

Hay'adaha diinta iyo dugsiyada waxay halis ugu jiraan in dacwad loo gudbiyo Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria (Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission) haddii aysan u hoggaansamin Xeerka Fursadaha Loo Siman yahay.

Ururada diinta iyo hay'adaha sidoo kale haysta waajibaadyada hoos yimaada Xeerka Fursadaha loo siman yahay waxay sidoo kale leeyihiin waajibaad sharci ah inay qaadaan tillaabooyin macquul ah oo saamile ah si loo baabi'iyo takoorka intii suurtogal ah. Tan waxaa loo yaqaan 'waajibaadka togan (positive duty)'. Ka jawaabista cabashooyinka soo baxa oo keliya kuma filna in loo hoggaansamo sharciga.

Waajibaadka dadka uu saaran yahay waxaa ka mid noqon kara:

• dadka loo shaqeeyo

• dadka bixiya hoyga, waxbarashada, iibiya badeecooyinka iyo adeegyada

• naadiyada iyo ururada isboortiga

Macluumaad ku saabsan sida loogu dhaqmo waajibaadka togan emarka laga hadlayo hab-dhaqanka iyo habraaca ayaa laga heli karaa bogga internetka ee Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isbeddelada sharciga fursadaha loo siman yahay ayaa laga heli karaa bogga internetka ee Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria.

Haddii aad u malaynayso in lagu takooray, macluumaad dheeraad ah, talo iyo adeegyo taageero ah ayaa laga heli karaa barta internetka ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Badbaadada Bulshada.

## Su'aalaha soo noqnoqda

Isbeddelku micnaheedu ma wuxuu yahay in dugsiyada diintu ay shaqaaleysiinayaan dad aanan ku diin ahayn?

Maya. Halka haysashada diin isku mid ah ay tahay qayb ka mid ah doorka (tusaale ahaan, xudunta, muhimka ah ama lagama maarmaanka ah), dugsiyada diinta waxay dooran karaan oo kaliya inay shaqaaleeyaan dadka haysta caqiidada diinta ee dugsiga.

Isbeddelku ma waxay ka dhigan tahay in dugsiyada diintu aanay sii bari karin diintooda?

Maya. Sharciyada la soo jeediyay ma saameeynayaan xaqa waalidku u leeyahay in uu carruurtooda u diraan dugsiyo diimeed oo bara kuna dhaqma diintooda.

Victoria ma meesha kaliya ee aduunka ee leh sharciyadan baa?

Maya. Waxaa jira sharciyo la mid ah oo ka jira Tasmania oo jiray in ka badan toban sano.

Isbeddelku ma waxay ka dhigan tahay in hay'adaha diintu aysan go'aansan karin cidda loo oggol yahay inuu noqdo wadaad ama imaam?

Maya. Sharciga Fursadaha Loo Siman Yahay waxa uu haddaba u oggolyahay hay'adaha diintu in ay go'aan ka gaadhaan cidda loo dooran karo doorarka ku lug leh ku dhaqanka diinta ama ilaalinta, sida wadaad ama imaam. Tan lama bedelin, isbeddeladana saamayn kuma yeelanayso.

Isbeddelku ma waxay ka dhigan tahay in dugsiyada diintu ay tahay inay aqbalaan ardayda diimaha kale?

Maya. Sharciga Fursadaha loo siman yahay wuxuu horayba u ogolaa in dugsiyada diiniga ah ay aqbalaan ardayda diinta ay khusayso oo keliya. Isbeddellada Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay micneheedu waxa weeye in dugsiyada diintu ay sii wadi karaan inay aqbalaan ardayda diinta ay khusayso oo keliya, haddii ay tani tahay mid macquul ah oo ku habboon xaaladaha.

Dugsiyada diintu miyay go'aansan karaan inaan macalin la qaadanin sababo la xiriira in macalinku yahay khaniis ama waalid aan xaas ahayn?

Maya. Dugsiyada diintu ma diidi karaan inay shaqaaleeyaan qof sababo la xiriira qofkaas xaaladiisa galmo ama xaaladiisa guur.

Dugsiyaya diinta ma waxaa laga rabaa inay qof shaqaaleysiiyaan xataa haddii qofkaas diintiisa ay ka duwan tahay tan dugsiga?

Maya. Xaaladaha qaarkood, halka caqiidada diintu ay tahay qayb ka mid ah doorka (sida inay muhim ama lama huraanka tahay), dugsigu wali wuxuu go'aansan karaa inaanu qof shaqaaleyn haddii qofkaas diintiisa ay ka duwan tahay tan dugsiga.

Isbeddelada Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay Miyay abuuraan halbeeg labanlaab ah (double standard) iyagoo u oggolaanaya kooxaha kale, sida xisbiyada siyaasadda, inay doortaan cidda ay shaqaaleysanayaan, marka ururrada diintu ay luminayaan xuquuqdan?

Maya. Hay'adaha diinta iyo dugsiyadu way sii wadi karaan inay doortaan cidda ay shaqaaleysiinayaan iyadoo lagu salaynayo caqiidada diineed. Laakin ma samayn karaan takoor ku salaysan sifooyin aan xidhiidh la lahayn sida galmoodka ama aqoonsiga jinsiga. Sidoo kale, xisbiyada siyaasaddu waxay dooran karaan oo keliya cidda ay shaqaaleysiin karaan iyagoo ku salaynaya caqiidada siyaasadeed ee qofka laakiin kuma salaysna sifooyin kale oo aan xidhiidh la lahayn.

Isbeddellada miyay jebinayaan sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha?

Maya. Isbeddelku wuxuu si habboon isugu dheellitirayaa xaqa xorriyadda diinta iyo xuquuqda sinnaanta si labadaba si habboon loo aqoonsado oo loogu raaxaysto.

Isbeddellada miyay u abuuraan awood cusub garsoorayaasha si ay u go'aansadaan ku habboonaanta diinta urur diimeed ama dugsi?

Maya. Marka loo eego sharciyada Australia ka jira waxaa jira waqtiyo ay maxkamadi u baahan karto inay go'aan ka gaarto nooca diinta ay ku dhaqmayaan hay'ad diimeed ama dugsi, iyadoo lagu saleynayo caddaymaha. Tani waa xaalad hadaba jirta marka la eego sharciyada jira ee Australia waxayna soo ahaan jirtay xaalad jirta wixii ka dambeeyay isbeddelada Xeerka Fursadaha Loo Siman yahay.

Isbeddellada ma aysan abuurin awood cusub si garsoorayaasha ay u go'aamiyaan diinta 'ugu fiican' ama 'ugu habboon'. Caqiidada diineed ama howlaha ayaa ah sifo la ilaaliyo oo hoos timaada Xeerka Fursadaha loo siman yahay.

## Yaa ku jira qeexida 'ururada diinta'?

Hay'ad diimeed waxaa lagu qeexaa sidatan:

- Hay'ad loo dhisay ujeeddo diimeed
- waa hay'ad dhista, hagta, ama maamulaysa hay'ad samafal oo waxbarasho ama mid kale taasoo loo maamulo si waafaqsan waxa u qoran, caqiidada ama mabaadi'da diinta.

Waa maxay macnaha 'waafaqsan waxa u qoran, caqiidada ama mabaadi'da diinta'?

Si loogu tiirsanaado tan keliya, urur diimeedku wuxuu u baahan yahay inuu muujiyo in takoorka loo baahan yahay sababtoo ah:

- diintoodu waxa ay faraysaa in ay u baahan yihiin in ay u dhaqmaan si gaar ah (ie, wado kale oo la siiyay majirto)
- u dhaqmida si ka duwan waxay ka dhigan tahay in arrimaha muhiimka u ah caqiidooyinka, caqiidooyinka ama dhaqamada aan la ixtiraamin.

Waxa diiradada la saarayo waa inay ahaataa:

• hab-dhaqanka gaarka ah ee urur diimeedku rabo inuu sameeyo; iyo

• sida habdhaqankaas looga baahan yahay inuu ugu hoggaansamo caqiidada diinta.

Tani waa qiimeyn qofba si u arki karo. Taas macnaheedu waa ma aha aragtida shakhsi ahaaneed ee takoorka lagu eedeeyay, laakiin aragti dhexdhexaad ah oo ku saabsan in dhaqanka loo baahan yahay iyo in kale.

Khadka weydiinta (Enquiry line) 1300 292 153

Fax 1300 891 858

NRS Cod Gudbinta (NRS Voice Relay) 1300 555 727 ka dibna xigasho 1300 292 153

Turjubaanada 1300 152 494

Email enquiries@veohrc.vic.gov.au

Twitter twitter.com/VEOHRC

Facebook facebook.com/VEOHRC

Website humanrights.vic.gov.au

Nala soo xiriir